Warbixinta Baanka Dhexe ee Sanadka 2018

(Annual performance report)

Baanka Dhexe ee Somaliland
(CENTRAL BANK OF SOMALILAND)

TUSMADDA WARBIXINTA

A. Dejinta Qiimaha Shilinka "Currency Stability "
B. Xakaymaynta Sicir bararka "Taming Inflation"
C. Curinta Xeerarka Haayaddaha Maaliyadeed "6 Financial Bills"
D. Diiwaan-galinta Lacagaha Dhoofa "Capital Flight"
E. E-Banking
F. Nidaaminta iyo korjoogtaynta Haayaddaha Maaliyadeed
G. Horumarka Shaqadda iyo Shaqaalaha
H. Dib u Qiimayn iyo Qurxin hantidda ma guurtadda ah
I. Qorshahayaasha Baanka ee Sanadka 2019

Fadlan waxii faahfaahina kala soo xidhiidh :

ALI IBRAHIM JAMA " BAQDAADI"
GUDDOOMIYAHA BAANKA DHEXE.
EMAIL: Alibrahim10@hotmail.com
Tel : 0633059605

==========

Bismillahi Raxmaani Raxiim,

HORDHAC

A) Asaaska Baanka Dhexe.

Baanka Dhexe ee Somaliland waxa lagu aasaasay Bank of Somaliland Act 1994, waxa uu la wareegay hantidi ma-guurtada ahayd ee Baanka Ganacsiga iyo Baankii Dhexe ee Ex-Somalia ee ku yaalay dhulka Somailand. Baanka Dhexe wuxuu leeyahay 12 Laamood oo ka furan Hargeysa, Gabilay, Boorama, Saylac, Berbera, Burco, Caynabo, Laascaanod iyo Ceerigaabo, waxaana ka hawl gala 352 shaqaale ah.

B) <u>Waajibaadka Baanka Dhexe</u>:

Sida uu qeexaayo Qodobka 4aad, Xeer Lr 54/2012, ujeeddada ugu muhiimsan ee Baanka Dhexe loo aasaasay waa inuu joogteeyo deggenaanshaha sicirka gudaha; noqdo Baanka Xukuumadda iyo La-taliyaha dhinaca lacagta iyo dhaqaalaha; Sameeyo siyaasadda lacagta Somaliland; Daabaco lacagta waraaqaha ah & qaddaadiicda; Maamulo kaydka lacagaha qalaad; Diiwaangeliyo Baananka; Xawaaladaha; Sarriflayaasha; Caymiska iyo Hay'adaha kale ee Maaliyadeed.

WAXQABADKII BAANKA DHEXE EE 2018-ka.

A). Dejinta Qiimaha Shillinka " Currency stability".

Kadib markii Baanka Dhexe ee Somaliland qaaday talaabooyin isdaba-joog ah, waxa saldhigay qiimaha Shillinka Somaliland oo ku fadhiistay Slshs 10,000 halkii doolarba. Waxa istaagay heehaabkii maalinlaha ahaa ee ka dhici jiray suuqa sarrifka khalkhalna gelin jiray ganacsiga iyo guud ahaanba dhaqaalaha dalka. Horaantii 2018 waxa uu heerka sarrifka ee halka (1) dollar marayay SLSH 10,700. Maanta oo aynu kujirno dhamaadkii sanadka 2018, waxa uu qiimaha halka (1) dollar uu marayaa SLSH 10,000 taas oo muujinaysaa in qiimaha shillinka Somaliland kor u kacay **6.5%.** jaantuskan hoose waxa uu muujinayaa heerka kor u kaca qiimaha shillinka Somaliland iyo hoos u dhaca qiimaha dollarka

Jaantuska 1aad: isbedeladii heerka sarrifka sanadkan 2018.



Isha: Qaybta Siyaasadda Lacagta Baanka Somaliland, September 2018.

Sababaha ugu waawayn ee keenay saldhigidda Shilinka Somaliland waxa ka mid ah:

1. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu si xirfad leh oo cilmiyaysan ugu guulaystay inuu xaddido xaddiga lacagta Shilinka Somaliland ee suuqa gelaaya "Money supply" taas oo yaraysay lacagtii faraha badnayd ee suuqyadda wadhnayd.

2. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu maalin walba soo saaraa Sicir Dhexe "**Mid-rate".** Sicirkaasi wuxuu meel dhexe isugu keenaa ascaarta kala durugsan ee sarriflayaasha

ka hawl gala gobollada dalka. Sarriflihii sicirkiisu kor u dhaafo Sicirka Dhexe "Mid-rate" in ka badan **2%** waxaanu ka saarnaa systemka elektarooniga ah, ruqsaddana waanu kala noqonaa.

3. Baanka Dhexe ee Somaliland wuxuu wareegto ku soo saaray Bishii Jan, 2018, in dhammaan shirkadaha waaweyni ay gabi ahaanba joojiyaan ka ganacsiga iyo isku-baddalka lacagaha qalaad . Amarkan waxa looga dan lahaa in suuqa laga saaro shirkadaha waaweyn ee kootada ku haystay suuqa sarrifka.
4. Si kor loogu qaado isticmaalka Shilinka Somaliland, Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu ka joojiyay adeegyada Zaad iyo E-Dahab in wixii ka yar **$ 100** aan macaamiishu isugu diri karin telefoonadooda gacanta ama wax lagu kala iibsan karin. Joojintaasi waxay door wayn ka qaadatay Isticmaalka, Faafinta iyo Kaydinta Shilinka Somaliland.
5. Xukuumadda Somaliland ayaa dhinaceeda ka xakamaysay kharashaadkii badnaa ee Dawladda Dhexe soo dayn jirtay kana baxsanaa oddoroska Miisaaniyadda Qaranka iyo Mashaariicda horumarinta.

Saldhigidda qiimaha Shilinka Somaliland ayaa soo celiyay kalsoonidii bulshadu ku qabtay cumladda qaranka (National currency) waxaana kor u kacay awoodda wax-gaddashada "Purchasing power" ee muwaadiniinta dakhligooda ku hela Shilinka Somaliland, siiba Shaqaalaha Dawladda, Ciidamada qalabka sida, iyo Xoogsatada.

B) <u>Xakamaynta Sicir Bararka " Taming inflation"</u>.

Muddooyinkii u dambeeyay waxa bil walba bisha ka dambaysa hoos u sii dhacaayay sicir bararka ka jira Somaliland. Bishii February, 2018 wuxuu sicir bararku taagnaa **19.1%;** March **18.9%;** April **18.3%;** May **17.6%**; June **15%**; July **13.6 %**; August **13.7%** iyo Sept oo uu hoos ugu dhacay **9.6%** (eeg jaantuska 2aad). Guud ahaan sicir bararka ka jira Somaliland waxa lagu tilmaami karaa mid khafiifa "Modest" kana hooseeya dalal badan oo Afrikaan ah oo ay ka mid yihiin: South Sudan 49% ; Angola 21.6 %; Masar 16 %; Nigeria 11.2%; Ethiopia 12.7 %; Congo 11 %; Somaliland 9.6% iyo Kenya oo ah 5.7 %.

Jaantuska 2aad: Heerka Sicir Bararka Guud ee Somaliland 9-ka bilood ee hore ee Sanadka 2018.



Sababaha ugu waawayn ee sicir bararka hoos u dhigay waxa ka mid ahaa: Sannadkan 2018 oo ku sifoobay sannad barwaaqo iyo wax-soo-saarkii beeraha oo kordhay; Shilinkii Somaliland oo saldhigay iyo kharashaadkii dheeraadka ahaa ee xukuumaduhu soo dayn jireen oo la xakameeyay.

C) Curinta Xeerar Maaliyadeed " 6 Financial Bills" .

Si loogu gogol-xaadho maalgashi caalamiga ah oo toos ah "Foreign Direct Investment", loona dhiirrigeliyo furista Baanan cusub, waxa lagama-maarmaan noqotay in la dejiyo shuruuc iyo xeerar waafaqsan shareecada Islaaamka oo lagu dhaqo Baananka iyo Hay'adaha Maaliyadeed. Si taasi uu suuragasho, Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu sannadkan 2018 curiyay **LIX XEER** oo kala ah:

1) Xeerka Baananka "Banking Act" (Xeer Cusub).
2) Xeerka Ka Hortagga Maydhitaanka lacagaha "Anti-Money Laundering Act" (Xeer Cusub).
3) Xeerka Xawaaladaha "Remittance Act" (Xeer cusub).
4) Xeerka Nidaamka Lacag Bixinta "Payment Systems Act" (Xeer Cusub).
5) Xeerka Baanka Dhexe "Wax ka beddel & kaabid".
6) Xeerka Baananka Islaamiga ah "Wax ka beddel & kaabid".

Dhammaan Xeerarkaasi waxay horyaalleen Hay'adaha Dawladda ee ay khusayso. Waxaanu ku rajo waynahay in si dhakhso ah loo ansaxiyo.

D) Diiwaangelinta Lacagaha Dhoofa "Capital Flight".

Baanka Dhexe ee Somaliland waxuu Laan (Branch) cusub ka furay Egal International Airport. Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee Laanta cusub loo furay waxa ka mid ahaa :

1) la socoshada dhaqdhaqaaqa lacagaha dalka ka dhoofa wixii ka badan Toban kun oo doolar (***US $ 10,000***)
2) In dadka soo degaaya loo fududeeyo helitaanka iyo sarrifka Shilinka Somaliland.

Waa markii ugu horraysay ee Xukuumadda Somaliland si dhaw ula socoto dhaqdhaqaaqa lacagaha dhoofa iyo kuwa soo degaba. Wadarta Lacagaha ka badan $10,000 ee laga dhoofiyay Madaarka Hargeysa muddadii u dhaxaysay **22 July** illaa **30 Actober 2018** waxay dhan tahay **$106 Million.** Waxaanu qiyaasaynaa in xaddiga lacagaha qalaad ee laga dhoofiyo Airportka Hargeysa ay kor u dhaafayso **$500 Million** sannad walba.

Dhoofista lacagahaasi waa xalaal mana jiro sharci xaaraantimaynayaa, waxaana dhoofiya ganacsatada kala geddisan ee dibadda wax kasoo iibsanaysa. Si loo xakameeyo lacagaha qalaad ee dalka ka baxaaya, Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu ku dadaalayaa in waddanka laga furo Baanan Caalami ah **"International Banks"** oo ganacsatada u suura-geliya inay bushcuradda ku dhoofiyaan kuna soo dejiyaan nidaamka loo yaqaan Ictimaad **"Letters of Credit"**. Sidaan hore u soo sheegay, Baanka Dhexe wuxuu sannadkan 2018 curiyay 6 Xeer oo lagu dhaqi doono Baananka.

E) E-Banking.

Baanka Dhexe waxa sanadka 2018 sameeyay habka loo yaqaan (E-Banking). Habkan oo u oggolaanaya macaamiisha Baanka Dhexe in ay ku kaydsan karaan, kalana bixi karaan lacagtooda iyaga oo jooga Xafiisyadooda ama guryahooda. Habbkan waxa si fudud loogu isticmaali doona telefoonada gacanta (Mobile Banking). Waxaanu ku rajo waynahay in aanu mushaharka shaqaalaha dawladda ku gaadhsiin doono qof waliba halka uu joogo . Waxa si tijaaba ah loogu bilaabi doona Shaqaalaha Gobolka Maroodijeex dhammaadka sannadka 2019, haddii Eebbe idmo.

F) Nidaaminta & Korjoogaynta Hay'addaha Maaliyadeed.

Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu xilsaaran yahay inuu Ruqsad siiyo, Diiwaangeliyo, Nidaamiyo iyo inuu Korjoogeeyo Baananka, Sarriflayaasha iyo Adeeg bixiyayaasha lacagaha. Isaga oo gudanaya waajibkaas, Baanka Dhexe ee JSL waxa uu sannadkan 2018 diiwaan-galiyay, ruqsadahana uu cusboonaysiiyay **345 Sarrifle**, **16 xawaaladood** iyo **3 shirkadood oo caymis ah.**

G) Horumarka Shaqada iyo Shaqaalaha.

G.1) Tababarro Dibadda ah " UK".

Sannadkan, waxa shaqaalaha Baanka Dhexe ee JSL loo sameeyay tababarro kala geddisan oo lagu qabtay dalka gudihiisa iyo dibeddaba. Waxa dalka Ingiriiska (UK) tababar muhiim ah loogu diray 4 Sarkaal oo ka tirsan shaqaalaha Baanka Dhexe, waxaana lagu soo tababarayaa Dejinta Siyaasadda Lacagta "Monetray Policy"; Dabagalka khiyaamooyinka lacagta "Financial Crimes"; iyo arrimo kale oo muhiim ah oo ku saabsan nidaamka ay u shaqeeyaan Baanka Dhexe. Waxay la kulmi doonaan Saraakiil sarsare oo ka tirsan "Bank of England" oo ah Baankii Dhexe ee ugu horeeyay caalamka oo la unkay 1694.

G.2) Guddida Horumarinta Baanka Dhexe.

Waxaanu samaynay Guddida Horumarinta Baanka Dhexe **"Development Committee"**. Guddidani iyaga oo kaashanaya khubaro, waxaa ay sannadkan soo saareen qorshaha Baanka Dhexe ee shanta sanno ee soo socda **2018-2023.** Guddidu waxaa ay iminka gacanta ku hayaan in ay qorshahaas hawl u baddalaan, taas oo Agaasinka Guud ee Baankuna dusha ka hagaan.

G.3) Dirays "Uniform".

Sanadkan 2018, waxa shaqaalaha Baanka Dhexe waxaa loo sameeyay Direys gaar u ah taas oo sahashay in si fudud loo kala garto Shaqaaliha iyo macaamiisha (customers). Waxaa kale oo arrintani soo celisay haybaddii , muuqaalkii iyo sharaftii Baankers-ku ku lahaayeen bulshada dhexdeeda.

H). Dib u Qiimayn & Qurxin Hantida ma-guurtada ah.

H.1) Dib u qiimayn Hantida Ma-guurtada ah " Real Estate Assets":

Si aanu u ogaanu qiimaha dhabta " market value " ee hantida maguurtada ee Baanka Dhexe leeyahay ka joogto suuqa , waxaanu sannadkan dib-u-qiimayn ku samaynay dhammaan Hantida ma-guurtada ah oo ka kooban **38 Dhisme iyo Dhulka** ay ku fadhiyaan. Dib u qiimayntaas oo aanu u adeegsanay khubaro ku xeel dheer, waxay isu-gayntu noqotay **$ 64 Million** oo aanu ku sajil-nay Xisaabta Dheellitirka "2018 Balance Sheet".

H.2). Dib u casriyayn Xarunta Dhexe & iyo Laamaha.

Waxaa sannadkan 2018 dayactir iyo casriyayn dhammaystiran lagu sameeyay Xarunta Dhexe ee Baanka Dhexe ee JSL, iyada oo loo qurxiyay hab casriya, isla markaana lagu qalabeeyay agab cusub. Waxaa kale oo dib-u-habayn iyo casriyayn wax ku ool ah lagu sameeyay Saddexda Laamood ee ku yaalla Hargeysa.

Qorshayaasha Sannadka 2019 oo kooban:

Sanadka 2019 waxa Baanka Dhexe u qorshaysan hirgelinta qorshayasha soo socda:

1) Xoojinta Siyaasadda Lacagta oo ku aadan la Dagaalka sicir bararka iyo kor u qaadista Qiimaha Shillinka Somaliland. Yoolka Baanka Dhexe waxa weeye inuu sicir bararku hoos maro **8%** , Qiimaha shilinka laandkuna ku fadhiisto **SLSH 9,000** halkii doolarba.
2) Samaynta furaha caalamiga "Swift Code" ee Baananku isku waydaarsadaan dirista lacagaha qalaad , furista ictimaadka iyo damaanadaha (Letters of Credit & Guarantees).
3) Curinta Xeerka Caymiska (Insurance Act).
4) Xoojinta Xidhiidhka Baananka Caalamka "Correspondent Banks".

5) Diyaarinta Xafiiska iswaydaarsiga adeegga maaliyadeed ee Baananka ka hawl gala Somaliland.(Clearance House).

3) Suuq ka saarista Lacagta waraaqaha ah ee duugowday.
4) Fulinta iyo dhaqan-galinta Xeerarka Baananka ee Baarlamaanka hor yaalla.
5) Dayactirka iyo dibuhabaynta laamaha Baanka Dhexe ee Gobollada iyo Furida Laamaha Wajaale iyo Oodweyne.

WA BILAAHI TOWFIIQ.